Victim Support
Helping people cope with crime

Burglary
Information and Advice from Victim Support

Budhcadnimo
Warar iyo talobixin ka imaaneysa Taageerada Dhibbanaha

Budhcadnimadu waa mid daran laakiinse ah denbi aad caadi u ah. 2001 gudaheeda, lixdii denbi ee laga diiwaan geliyey UK-ba hal ayaa ahaa Budhcadnimo. Budhcadnimadu waxay u dhici kartaa habab kala duwan. Waxaa laga yaabaa inaad waqtigaas guriga ka maqneyd. Waxaa laga yaabaa inaad joogtay isla markaana qof baa si khayaano ah gudaha u soo galay, ama mashquul ayaad ahayd ama waad hurudday. Isla markaana budhcadnimadu maahan mid hal dhacdo ku dhammaata – dadka qaar ayaa laga yaabaa in dhowr goor la xaday ama ay denbiyo kale la il daran yihiin, sida dhibaatayn.

Taageerada Dhibbanuhu waxay gacan ka geysan kartaa
Inaan la xiriirno in ka badan malyuun dad ah oo uu denbigu saameeyey sanad walba. Si kasta oo aad dareensan tahay, isla markaana mar kasta oo ay budhcadnimada ama denbiyada kale dhacaan, waxaad la hadli kartaa qof ka socda Taageerada Dhibbanaha iyadoon lacag lagaaga qaadeyn isla markaana kalsooni buuxda leh. Waan ku caawin karnaa, iyadoon loo eegeyn inaad booliiska ama qof kale u sheegtay iyo in kale.

Dhibbaneyaasha denbigu badankood waxay rabaan inay qof kala hadlaan waxa dhacay iyo waxa ay dareensan yihiin. Saaxiibbada iyo qoysku waxay ahaan karaan kuwo aad caawino u geysan kara, laakiin mutadawiciinteenna ayaa si gaar ah loogu tababaray inay ku dhegeystaan kuna fahmaan. Waxaan sidoo kale ku deeqi karnaa war wax ku ool ah si aan kaaga caawinno inaad wax uga qabatid qaar ka mid ah mashaakillada uu denbigu kuu keenay. Mararka qaarkood xataa waxaan diyaarin karnaa caawino camali ah.

Budhcadnimadu waxay dadka u saameysaa habab baaxad weyn oo kala duwan. Budhcadnimadu dadka way saameyn kartaa xataa haddii aan mid ka mid ah hantidooda la xadin. Dadka intooda badan way caloolyoobaan marka ay ka fekeraan in qof guryahooda soo galay oo keliya iyagoon u oggoleyn. Dadka qaarkood dib danbe inay guryahoodu ammaan u yihiin uma dareemaan budhcadnimada ka dib. Carruurtu gaar ahaan waxay noqon karaan kuwo la cabsi geliyey. Qof kasta oo la saameeyey, si kastoo loo saameeyey, wuxuu la xiriiri karaa Taageerada Dhibbanaha.

Sidee Taageerada Dhibbanuhu wax u caawin kartaa
Waxaan dadka la dhacay u caawin karnaa habab dhowr ah:
- Dhibbaneyaal budhcadnimo oo badan ayaa wanaag dareema ka dib markay la hadlaan qof madax bannaan oo saaxiibbadood iyo qoyskooda ahayn isla markaana loo tababaray inuu

dhegeysto. Dad qaar ayaa laga yaabaa inay u baahdaan caawino aad u badan, taasoo ay Taageerada Dhibbanuhu diyaarin karto.

- Dadka la dhacay waxay inta badan u baahan yihiin talobixin si looga caawiyo inay uga fogaadaan in mar kale la dhaco. Taageerada Dhibbanaha ayaa kula xiriirin karta dadka saxda ah haddii aannaan kaa caawin Karin inaan nafteennu wax ka qabanno.
- Haddii aadan iska bixin karin hagaajinnada ammaanka sida in qufullo cusub laguu xidho, waxaan mararka qaarkood kuu diyaarin karnaa caawino camali ah.
- Haddii aad dhibaato qabtid iyadoo ka timid denbi waxaan sidoo kale kaa caawin karnaa in aad la mucaamalootid dadka sida milkiilha, waaxda guriyeynta, booliiska, ammaanka bulshada, ama shirkadda caymiska.

Sidee loola xiriiraa Taageerada Dhibbanaha

Dadka intooda badan waxaa booliisku uu u diraa Taageerada Dhibbanaha markay denbi ku soo wargeliyaan. Laakiin qof kasta wuu la xiriiri karaa Taageerada Dhibbanaha haddii ay doonayaan. Waxaad faah faahinta laanta deegaankaaga ka heli kartaa dhinaca danbe ee warqaddaan qoran, shabakadda Taageerada Dhibbanaha ee (www.victimsupport.org) ama buugga telefoonnada. Sidoo kale waxaad Victim Supportline (khadka Taageerada Dhibbanaha) ka wici kartaa 0845 30 30 900 si aad u heshid taageero iyo war.

Waxaan rajeyneynaa inaad nala soo xiriirtid, laakiin haddii aad hadda go'aansatid inaadan nala soo xiriirin, waad na soo wici kartaa marxalad kasta ee mustaqbalka.

Haddii aadan booliiska ku wargelien budhcadnimada, waxaa laga yaabaa inaad rabootid inaad annaga arrinkaa nagala hadashid. Haddii aad leedahay caymis guri, waxaad booliiska uga baahan doontaa lambar tixraac denbi si aad codsi u sameysatid.

Xoogaa fikrado camali ah

Waa xaqiiqo xun inaad budhcadnimo ka dib aad khatar sare ugu sii jirtid in mar kale lagu dhaco. Ururro badan, marka lagu daro booliiska, waxay kuugu deeqi karaan war iyo talo ku saabsan sida mustaqbalka looga hortagayo budhcadnimada.

Laakiin waxaa laga yaabaa in arrimahaan sahlan ay ku caawin karayaan:

- Waxaad u baahan doontaa inaad ururro u oggolaatid isla markaana 'saraakiisha' kale ay ogyihiin haddii walxo la qaatay. Walxaha la hubinayo waxaa ku jira kaararka bangiga, buugaagta jeegagga, baasaboorrada, buugaagta manfacyada, telefoonnada gacanta, warqadaha dhalashada iyo laysannada baabuurta lagu wado. Gaar ahaan waa muhiim in si deg deg ah loo wargeliyo bangiyada si markaas ay wax is dabab marin uga hortagaan iyo xatooyo dheeraad ah.
- Isku day inaad gurigaada ammaan uga dhigtid sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Haddii aad ku jirtid hoy kiro ah, milkiilaha ku wargeli wixii dayactir lagama maarmaan ah. Haddii aad gurigaaga adigu iska leedahay, waxaad u baahan tahay inaad iskuduwid kuu gaar ah sameysatid.
- U fiirso habab aad gurigaaga uga yeeleysid mid aad ammaan u ah. Tallaabooyinka ammaanka qaarkood waxay noqon karaan kuwo qaali ah. Laakiin waxaa jira waxyaabo aad sameyn kartid

oo qiimo yar ku kacaya, sida inaad nalalka iyo raadiyaha oo shidan ka tagtid markaad dibedda aadeysid iyo adigoo hubinaya in irridaha iyo dariishadaha oo dhan si habboon loo xidhay.

Wax ku saabsan Taageerada Dhibbanaha

Taageerada Dhibbanuhu waa hay'ad samafal oo qaran oo loogu talogalay dadka uu denbigu saameeyey. Adeegyadeennu waa lacag la'aan, kuwo kalsooni leh qof walbana uu helayo haddii denbiga booliiska lagu wargeliyey iyo haddii kaleba.

La xiriir laanta Taageerada Dhibbanaha ee deegaankaaga

Victim Supportline
(Khadka Taageerada Dhibbanaha)
0845 30 30 900

Khadka Taageerada Dhibbanaha wuxuu sidoo kale kula xiriirin karaa laanta Taageerada Dhibbanaha ee deegaankaaga.

Waxaa daabacay Victim Support (Taageerada Dhibbanaha)
Madaxa HRH ee Princess Royal

Victim Support National Office, Cranmer House,
39 Brixton Road, London, SW9 6DZ
Telefoon: 020 7735 9166 Faakis: 020 7582 5712
Shabakad: www.victimsupport.org

Diiwaan gelinta Hay'adda: 298028 Lambarka Shirkadda: 2158780
Waxaa laga diiwaan geliyey Dammaanadda Xaddidan ee Igland
Xafiiska Diiwaan geliyey sida kore.